

Ogolaanshaha Lacag bixinta Ootamatikada ah iyo Macluumaada Wereejinta Lacagaha Elaktarooniga ah Automatic Payment Authorization and Electronic Funds Transfer Information

Muxuu yahay ogolaanshaha lacag bixinta ootamatikada ah?

Ogolaanshaha lacag bixinta ootamatikada ah waa ogolaanshahaaga aad u ogolaatid Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS) si looga gooyo taakulaynta ilmaha jeegaaga ama xisaabta koontada keydadkaaga ka ahaata dhinaca Wereejinta Lacagaha Elaktarooniga ah (EFT).

1. Adiga ayaa dooranaya taariikhda ama taariikhaha bisha Qaybta Taakulaynta Ilmahana waxay qaadanaysaa jeritaanada. Adiga masamaysan kartid jadwal jeritaano ah oo kusalaysan maalin todobaadka kamid ah.
2. Haddii ay noqoto maalinta jeritaanka Sabti, Axad, fasaxa bangiga, ama fasaxa dowlada, Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay kajeri doontaa lacag bixinta maalintaan shaqo ee soo socota.
3. Haddii ay noqoto maalinta jeritaanka maalinta u dambaysa bisha, haddana maalintaasi ay noqoto Sabti ama Axad, Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay lacag bixinta kajeri doontaa maalinta shaqo ee bisha u dambaysa. Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay kudabakhi doontaa lacag bixinta kiiskaaga maalinta ay dhacayso jeritaanka.

Jeritaanka Wereejinta Lacagaha Elaktarooniga laguma badali karo xajinta mushaarka dowlada loo xilsaarey. Haddii uu kiiskaaga uga baahanyahay in Qaybta Taakulaynta ay sameyso xajin dakhli, waxaan sii wadi doonaa in aynu sidaas sameyno.

Sidoo kale waxaad isku diiwaan gelin kartaa si aad ugu bixisid sitoos-ah boggaan intarnatka <https://secure.dshs.wa.gov/dconline/>.

Haddii aan doonayo jeritaano lacag bixin ootamatik ah oo lagu sameeyo koontada xisaabta bangigayga, maxaan sameynayaa?

Kadhigo bogga 1 ee foomkaan tixraac mustaqbalka ah.

Buuxi bogga 2aad ee foomkaan (Ogolaanshaha Lacag bixinta Ootamatikada ah).

1. Haddii aad leedahay koonto xisaab oo wadajir ah, iska hubso in dhammaan dadka haysta koontadaada xisaabta ay sikiixaan ogolaanshaha.
2. Soo lifaaq jeeg aan shaqaynayn ama warqad rahmaad ah oo loogu talagalay xisaabtaada koontada bangiga.

Kusoo celi dhammaan bogga 2aad ee foomkaan iyo jeega aan shaqaynayn ama warqada rahmaadka dhinaca:

DIVISION OF CHILD SUPPORT
EFT PAYMENTS
P O BOX 9010
OLYMPIA WA 98507-9010
ama faakis ugu dir dhinaca 360-664-5109

Kadibna maxaa dhacaya?

Shaqaalaha Fulliya Taageeradaada wuxuu u baahnaan karaa in uu ogolaado jeritaankaaga ootamatikada ah.

Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay xaqiiqsan doonaan lambarkaaga xisaabta bangiga.

Waxaad heli doontaa warqad lagu xaqiijinayo taariikhda biloowga iyo tirada lacagta lajerayo.

Waxay qaadanaysaa kudhowaadkii 30 maalmood si loo sameeyo jeritaanka lacagta.

Waxaa khasab kugu ah in aad sii waadid sameynta lacag bixinada taakulaynta ilmaha illaa uu kabilowdo jeritaanka.

Maxaan sameynayaa haddii bangigayga uusan sameynin jeritaanka ootamatikada ah?

Haddii bangigaaga uusan u sameynin jeritaanka sabab lacag aan kufilnayn darteeda ah, joojin lacag bixin, ama xisaab koonto xiran, Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay burin doontaa jeritaanada ootamatikada mustaqbalka ah ee lagu sameeyo xisaabta koontada bangigaaga. Haddii aad u malaysid in bangigaaga uusan sameyn doonin jeritaan lacag, kawac Qaybta Taakulaynta Ilmaha lambarkan 800-468-7422.

Siddeed U joojiyaa ama u bedelaa lacag bixinta ootamatikada ah?

Waxaa **khasab** kuga ah in aad kawacdid saldhigyada Qaybta Taakulaynta Ilmaha lambarkan 800-468-7422 si aad u joojisid ama u bedeshid jeritaanka lacagta.

Kaliya DCS ayaa joojin karta ama beddeli karta ka jaritaan, ee bankiga ma sameyn karo.

1. U ogolow ugu yaraan 10 maalmood si loo joojiyo ama loo bedelo jeritaanka lacag bixinta. Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxaa dhici karta in aysan awood u yeelan in ay joojiso ama bedesho jeritaanka haddii aynaan la inoogu soo wargelin ugu yaraan kahor 10 maalmood oo ah jadwalka taariikhda lacag bixinta.
2. Bankigaaga ma joojin karo ama ma bedeli karo jeritaanka lacagta.

Ogolaanshaha Lacag bixinta Ootamatikada ah Automatic Payment Authorization

MAGACA WAALIDKA LACAG BIXIYAHA		CINWAANKA IIMAYLKA (IKHTIYAARI)	
CINWAANKA WADDADA AMA XAFIISKA SANDUUKHA BOOSTADA			
MAGAALADA		GOBOLKA	FURAHA XAAFADA
LAMBARKA DAMMAANADA BULSHADA		LAMBARKA TELEEFONKA MAALINIMO	
LAMBARKA KOONTADA BANGIGA <input type="checkbox"/> XISAABTA SOCOTA <input type="checkbox"/> KEYDADKA		LAMBARKA WADDADA BANGIGA	
MAGACA BANGIGA		LAMBARKA TELEEFONKA LAANTA BANGIGA	
TIRADA LACAGTA JERITAAN KASTA		JERITAANKA LACAGTA GUUD EE BILAHA AH	
TAARIIKHAHA JERITAANKA LACAGTA BIL KASTA		TAARIIKHDA LABILAABAYO JERITAANADA	
Aniga waxaan ogolaanayaa jeritaanada kor kuqoran ee lagu sameeyo koontadayda xisaabta loogu talagalay lacag bixinta Diiwaan gelinta Taageerada Gobolka Washington.			
SIXIIXA HAYSTAHA KOONTADA XISAABTA		Matahay midaan bedelid laga bedelaayo EFT hore u jirtay? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	
SIXIIXA HAYSTAHA KOONTADA XISAABTA (LOOGU TALOGALAY XISAABAADKA WADAJIRKKA AH)			
FOR DCS USE ONLY (KELIYA LOO ISTICMAALAYO QAYBTA TAAKULAYNTA ILMAHA)			
BASIC INDIVIDUAL NUMBER		IV-D CASE NUMBER	DCS OFFICE

Soo lifaaq Jeeg Aan shaqaynayn ama Warqad Rahaamad

Qofna sababo la xiriira qoladiisa, midabkiisa, waddanka uu kasoo jeedo, caqiidadiisa, diintiisa, lab ahaan ama dheddig ahaan, da'diisa, ama curyaanimadiisa, looguma takoori karo shaqo-qoris, adeegyo, ama aragti kasta ee waxqabadyada barnaamijka ah. Foomkan waxaa loo heli karaa qaabab baddel ah haddii la codsado.